ASSOCIATION OF SOMALI UNIVERSITIES

ASU\068\2025 Date: 15/12/2025

**WAR-SAXAAFADEED**

***Bismillaahi Raxmaani Raxiim***

Maaanta oo ay taariikhdu tahay 15 Dec 2025, Midowga Jaamacadaha Soomaaliyeed waxay halkaan ku soo gudbinaayaan warmurtiyeed ay uga cabanayaan Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare Dowladda iyo Guddiga Doorashooyinka Qaranka iyo oo ku khasbaya jaamacadaha in xarumahooda waxbarashada loo adeegsado qabashada doorashooyinka ay dowladdu sheegtay ee lagu muransan yahay. Arrintaani waxay khatar toos ah ku tahay madaxbannaanida, badbaadada, iyo sii socoshada waxbarashada dalka oo hadda ku jirta marxalad soo kabasho ah.

Goobaha waxabarashada oo intooda badan ah goobo gaar loo leeyahay oo madaxbannaan ayaa cadaadis weyn lagu saarayaa in si khasab ah lagu maquuniyo iyadoo aan la helin oggolaansho buuxda oo ka yimaada maamulka iyo milkiilayaasha goobaha ay ku shaqeeyaan bahda waxbarashada. Waxaa kale oo muuqata in aan la samaynin qiimeyn amni oo ku filan, taasi oo ay caddeyn u tahay dhacdadii amni daro ee maalin hore (11 Dec 2025) ka dhacday dugsiga Ilays ee xaafadda Ciise Cabdi ee degmada Deyniile. Arrintani waxay dhalisay cabsi, hubanti la'aan amni, iyo khilaaf bulsho oo xoog leh, maadaama ay doorashadu tahay mid lagu muransan yahay.

Ururka Jaamacadaha Soomaaliyeed waxay si weyn uga walaacsan yihiin adeegsiga xarumaha waxbarashada (Iskuullo, Machadyo, iyo Jaamacado) in loo beddelo goobo lagu qabto doorashooyinka. Waxbarashadu waa tiir asaasi u ah horumarka dalka, waxaana lagama maarmaan ah in la ilaaliyo madaxbannaanideeda, amnigeeda, si goobaha waxbarashada ay u helaan jawi munaasab ku ah waxbarista iyo barbaarinta u badka Soomaaliyeed.

**Dhibaatooyinka waaweyn ee ka dhalan karo in doorashooyinka lagu muransanyahay lagu qabto goobaha waxbarashada:**

1. **Amni darro iyo halis naf iyo maalba leh**: Goobaha waxbarashada waxay noqon karaan bartilmaameed rabshado, isqabqabsi siyaasadeed, ama falal amni darro, taasoo khatar gelinaysa ardayda, macallimiinta, maamulka, dhismayaasha waxbarashada, iyo agabka waxbarashada ee Iskuullada iyo Jaamacadaha.

2. **Hakinta iyo carqaladeynta waxbarashada**: Casharrada, imtixaannada, iyo jadwalka waxbarasho oo uu hakad ku yimaado waxay saameyn toos ah ku yeelanaysa tayada waxbarashada. Waalidiintu waxay ka cabsi qabayaan badbaadada carruurtooda, taasoo keeni karta in arday badan laga joojiyo imaanshaha goobaha waxbarashada.

3. **Ka saaridda dhexdhexaadnimada goobaha waxbarashada**: Iskuullada iyo Jaamacadaha waa in ay ahaadaan meel ka madax-bannaan siyaasadda koox gaar ah, u isticmaalka doorashooyin lagu muransan yahay wuxuu dhaawacayaa sumcadda iyo dhexdhexaadnimada hay'adaha waxbarashada.

4. **Cadaadis iyo cabsi ku timaadda ardayda, macallimiinta iyo maamulka goobaha waxbarashada**: In bahda waxbarashada lagu qasbo ama lagu cadaadiyo ka-qaybgalka ama taageeridda dhinnacyo siyaasadeed oo gaar ah, waxay lid ku tahay xorriyadda muwaadiniinta. Arintaani waxay ardayda iyo hawlwadeenada waxbarashada ku keeni kartaa walbahaar, cabsi, iyo jahwareer maskaxeed, taasoo saameyn xun ku yeelan karta waxbarashada iyo korriimada ardayda iyo kartida shaqo ee howlwadeenada waxbarashada.

5. **Ku xadgudubka xuquuqda ardayga**: U isticmaalka goobaha waxbarashada ujeeddooyin siyaasadeed wuxuu ka hor imaanayaa xuquuqda ardayga ee ah helidda waxbarasho ammaan ah oo xasilloon.

6. **Kala qeybsanaan iyo is nacayb bulsho**: Siyaasadeynta goobaha waxbarashada, gaar ahaan qabashada doorashooyin lagu muransanyahay waxay keeni kartaa kala-qaybsanaan ku timaada ardayda iyo shaqaalaha dhexdeeda, taasoo dhaawaceysa wada-noolaanshaha iyo is-ixtiraamka.

7. **Saameyn taban oo muddo dheer ah**: Waxbarasho carqaladeysan waxay dhalin kartaa jiil aqoon ahaan iyo anshax ahaan tabar daran, taasoo mustaqbalka dalka saameyn wayn ku yeelanaysa.

<u>Baaq iyo Talo-Soo-Jeedin</u>

- Waxaan **ugu baaqeynaa Guddiyada Doorashooyinka** inay ka fogaadaan adeegsiga khasabka ah ee xarumaha waxbarashada, isla markaana ay doortaan goobo kale oo ku habboon howlahooda doorasho, sida xarumaha degmooyinka iyo goobaha kale ee dowladeed.
- Waxaan **ka codsaneynaa Madaxda Dowladda iyo Hay'adaha Amniga** inay ilaaliyaan madaxbannaanida xarumaha waxbarashada kana fiirsadaan wixii amnidarro u soo jiidaya.
- Waxaan **ku dhiirrigelineynaa Bahda Waxbarashada** inay si wadajir ah u muujiyaan mowqifkooda, uguna doodaan ilaalinta jawi waxbarasho oo nabdoon.
- Waxaan **ku boorinaynaa Dhammaan Daneeyayaasha kala duwan** inay ixtiraamaan xaqa ardayda ee helidda waxbarasho joogto ah, nabad ah, kana madax bannaan isqabqabsi iyo khilaafaadka siyaasadeed.
- Waxaan si gaar aha **Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada** u xasuusinaynaa in masuuliyad gaar ah ay ka saaran tahay guud ahaan waxbarashada dalka, waxaana ugu baaqaynaa inuu bahda waxbarashada ka daayo faragelinta joogtada ah ee waxyeellaynayso horumarinta waxbarashada.
- Waxaan **ugu baaqayaa Madaxda Qaranka, gaar ahaan Madaxweynaha, Ra'iisul Wasaaraha, iyo Guddoonka labada aqal ee baarlamaanka Soomaaliyeed** in dhibaatada bahda waxbarashada lagu hayo ay soo farageliyaan, dhibaatada ka iman kartana looga hortago.

<u>Gabogabadii iyo Gunaanadkii</u>

- Waxaan mar kale carrabka ku adkaynaynaa in waxbarashadu tahay tiirka horumarka qaranka ayna ka sarreyso arrin la dhexgalin karo muran siyaasadeed, sidaas darteed, waxaa loo baahanyahay in la siiyo ilaalin gaar ah. Mas'uuliyadda qarannimo-na waxay ku jirtaa in la dhowro mustaqbalka ardayda Soomaaliyeed, lana hubiyo in goobaha waxbarashada ay sii ahaadaan kuwo ammaan ah, dhexdhexaad ah, kana madax-bannaan siyaasadda.

- Marka loo eego sharciga, siyaasadeynta iskuullada iyo Jaamacadaha, ama u adeegsiga doorashooyin lagu muransan yahay, waa arrin ka hor imaanaysa Dastuurka Federaalka Soomaaliya, Mabaadi'da Sharciga Doorashooyinka iyo Heshiisyada caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, sidaas darteed waxaan rajaynaynaa in arrintaasi laga fogaado.

WABILLAAHI TAWFIIQ

17:40

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَٰنِ الرَّحِيمِ

Dec 15,2025

# WAR SAXAAFADEED

Qeyb ka mid ah Maamulayaasha Iskuullada Gobolka Banaadir waxay si cad u soo bandhigayaan cabasho iyo walaac aad u xooggan oo ay ka qabaan tallaabooyin sharci-darro ah oo ay qaadeen Guddiga Doorashooyinka, kuwaas oo ay ka mid tahay in ciidamo hubeysan si qasab ah loo soo dul dejiyey xarumaha waxbarashada.Arrintan waxay si toos ah u khatar gelisay ammaanka, waxbarashada iyo mustaqbalka ardayda Soomaaliyeed, iyadoo jebinaysa xeerarka, anshaxa iyo shuruucda ilaalinaya goobaha waxbarashada.Maamulayaasha Iskuulladu waxay warbaahinta iyo shacabka Soomaaliyeed la wadaagayaan in tallaabadan ay keentay **dhibaatooyin waaweyn oo ay ka mid yihiin:**

1. Cabsi baahsan oo ku dhacday ardayda iyo waalidiinta, taas oo keentay in arday tiro badan ay ka baaqsadaan imaanshaha iskuullada.
2. Hoos u dhac weyn oo ku yimid joogitaanka ardayda, taas oo curyaamisay habsami u socodkii waxbarashada.
3. Khatar amni-darro oo si toos ah u taabanaysa xarumaha waxbarashada, kaddib markii qaraxyo ka dhaceen iskuullo ay ciidamo dul deggenaayeen.
4. Halis naf iyo maalba ah oo soo wajahday ardayda, macallimiinta iyo howl-wadeennada iskuullada.
5. Isku dhex-yaac khatar ah oo u dhexeeya ardayda iyo ciidamada hubeysan, taas oo meesha ka saartay jawigii waxbarasho iyo barbaariin carruureed.
6. Saameyn nafsi ah oo daran oo ku dhacday ardayda, gaar ahaan carruurta da'da yar, taas oo dhaawacaysa maskaxdooda iyo barbaarintooda.
7. Hakinta iyo carqaladeynta jadwalka waxbarasho, oo ay ku jiraan casharro, imtixaano iyo hawlo tacliimeed.
8. Ku xadgudub cad oo lagu sameeyey karaamada iyo madaxbannaanida xarumaha waxbarashada, kuwaas oo sharci ahaan ka reeban in loo adeegsado ujeeddooyin siyaasadeed ama amni.
9. Ku takri-fal awoodeed oo ay sameeyeen Guddiga Doorashooyinka, iyaga oo adeegsanaya goobaha waxbarashada dano siyaasadeed.
10. Kalsooni-darro ku timid xiriirka u dhexeeya waalidiinta iyo maamulayaasha iskuullada, sababo la xiriira badqabka ardayda.

**11.** Khasaare dhaqaale oo soo gaaray iskuullada, sababo la xiriira maqnaanshaha ardayda iyo hakadka waxbarashada.

**12.** Khatar gelinta hantida waxbarashada, oo ay ku jiraan dhismayaal, qalab iyo agab waxbarasho.

**13.** Ku tumasho lagu sameeyey xuquuqda aasaasiga ah ee carruurta, gaar ahaan xaqa ay u leeyihiin waxbarasho ammaan ah.

**14.** Sumcad-darro ku dhacday xarumaha waxbarashada, taas oo hoos u dhigtay kalsoonidii waalidiinta.

**15.** Isticmaal siyaasadeed oo lagu sameeyey waxbarashada carruurta, taas oo ka hor imaaneysa sharciga, anshaxa iyo mas'uuliyadda qaran.

**16.** Jahawareer iyo hubanti la'aan ku saabsan mustaqbalka waxbarashada ardayda, taas oo walwal weyn ku abuurtay qoysaska Soomaaliyeed.

## QODOBADA DASTUURKA EE ARRINTAN JABINAYA (5 QODOB)

**1. Qodobka 14aad – Karaamada Aadanaha:**
Dastuurku wuxuu dammaanad qaadayaa karaamada muwaadiniinta, gaar ahaan carruurta, taas oo lagu tuntay marka goobaha waxbarashada loo beddelo xarumo ciidan.

**2. Qodobka 15aad – Xuquuqda Carruurta:**
Carruurta waxay xaq u leeyihiin daryeel, badbaado iyo waxbarasho ammaan ah, mana bannaana in lagu khalkhal geliyo amniga dugsiyadooda.

**3. Qodobka 30aad – Xuquuqda Waxbarashada:**
Muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay waxbarasho tayo leh oo ammaan ah, arrintaas oo si cad loo carqaladeeyey.

**4. Qodobka 42aad – Mas'uuliyadda Dowladda:**
Dowladda waxaa waajib ku ah ilaalinta adeegyada aasaasiga ah, gaar ahaan waxbarashada, kana hortagidda fal kasta oo halis gelinaya.

**5. Qodobka 44aad – Ilaalinta Hantida Guud:**
Xaruumaha waxbarashadu waa hanti guud, mana bannaana in loo adeegsado ujeeddooyin gaar ah ama siyaasad.

## GO'AAMADA IYO BAAQA MAAMULAYAASHA ISKUULLADA :

Maamulayaasha Iskuullada Gobolka Banaadir waxay Si adag u cambaaraynayaan tallaabada sharci-darrada ah ee Guddiga Doorashooyinka.Si cad u dalbanayaan in si degdeg ah ciidamadu uga baxaan dhammaan xarumaha waxbarashada.Ugu baaqayaan hay'adaha dowladda ee ay khusayso, gaar ahaan Wasaaradda Waxbarashada, Wasaaradda Amniga iyo Maamulka Gobolka Banaadir, in ay qaadaan tallaabo degdeg ah oo lagu sugayo badqabka ardayda.Ku adkeynayaan in waxbarashada carruurta Soomaaliyeed ay ka sarreyso dano kasta oo doorasho iyo siyaasad.

Ugu dambeyn, Maamulayaasha Iskuulladu waxay mar kale carrabka ku adkeeyeen in ammaanka, maskaxda iyo mustaqbalka ardayda Soomaaliyeed ay yihiin mas'uuliyad qaran oo aan marnaba la dayici karin.

**— DHAMMAAD —**